



back to Early Years

September 2020



ISLINGTON

Ku soo dhowow qofkasta oo ku soo laabta xannaanada carruurta iyo xannaaneeyayaasha

Ilaa iyo 20kii Luulyo, xannaanooyinka iyo barbaariyayaasha ayaa awood u yeeshay inay soo dhoweeyaan dhammaan carruurta si nabadgelyo ah. Tani waxay muhiim u tahay horumarka guud ee carruurta oo macnaheedu yahay waalidiinta inay ku noqon karaan shaqada.

Xannaanooyinka iyo xannaaneeyayaasha ayaa raacaya hagida caafimaadka bulshada ee maxalliga ah iyo ta qaran si ay uga dhigaan carruurta qaan amman badbaado leh.

Caruurta yaryar ma fidiyaan cudurka **Coronavirus** in ka badan dadka waaweyn. Dadka intooda ugu badan - iyo gaar ahaan carruurta - haddii ay fayras ku qaadaan, astaamuhu waxay noqon doonaan kuwa sahlan.

Amaankaga Badbaadi

Waxaan dhamaanteen ubaahanahay inaan wada shaqeyno si aan u hubinno inaan ilaalino amaanka xannaanoyinkeena, sidaa darteed fadlan xusuusnow inaad:



Sii wad gacmo dhaqistaada



Kala fugnaan bulsho halka ay suura gal tahay, - gaar ahaan albabka xannaanada ama barbaariyaha



Ka dheerow haddii adiga ama ilmahaagu (ama qof aad la nooshahay) oo leeyahay astaamo

Caafimaadkaaga ilaali



Tallaalku wuxuu ilaaliyaa adiga iyo qoyskaaga. Kala hadal Takhtarkaaga Guud (GP) si aad u hubiso in tallaallada carruurtaada iyo dhammaan reerkaaga ay yihiin kuwo la dhamaystiray.



U fiirso tallaalka hargabka sannadlahaa ah ee bilaashka ah - tani xitaa waa ka sii muhiimsan tahay sannadkan. Caruurta da'doodu tahay 2 iyo 3 iyo qaar ka mid ah dadka qaangaarka ah ayaa tan oo soo bandhigi doonaan GP-yadooodo.



Soco, Baaskiil ama Scoot ku aad xanaanada ama xanaanada caruruurta haddii aad awoodid, intii aad qaadan lahayd gaadiidka dadweynaha.

Isbaadh haddii adiga ama ilmahaagu aad leedahay astaamo:

- Shaybaarada waxaa laga dalban karaa khadka tooska ah ee shabakadda: www.nhs.uk/ask-for-a-coronavirus-test
- Wixii caawimaad ah ee ku saabsan tijaabinta, fiiri www.nhs.uk/contact-us/get-help-with-asking-for-a-coronavirus-test/

Caruruurta iyo shaqaaluhu guud ahaan uma baahna inay xirtaan daboolida wajiga xanaanada ama xanaanooyinka.

Faahfaahin intaa ka badan kala soco

Waa la xiriiri kartaa xannaano-maalmeedkaaga ama xannaanada-guriga haddii aad wax su'aalo ah qabto. Boqdaahaaga Caafimaadka wuxuu kaloo ku faraxsan yahay inuu kaala hadlo wixii ku saabsan wixii welwel ah ee aad qabtid, tusaale ahaan haddii aad ka tirsantahay Qoomiyada Madowga, Aasiya ama Dadka laga tirada badan yahay ama haddii ay jiraan awoowe ama xubno qoyska ka mid ah oo nugul.

Boqashada Cafimadka EE Islington: Eeg www.whittington.nhs.uk/brightstarhvislington ama waac

■ Bingfield Health Centre: **020 7527 1610**

■ River Place: **020 3316 8461**

■ Highbury Grange Health Centre: **020 3316 8012**